

This is a copy of the Decree issued by the Deputy Minister of Justice on 30 October 2007 in which he ordered the Ministry of Interior and the Police to eject the current board of SHURO-Net and to install in the offices of the organisation the new board chosen at a meeting he attended on 24th January 2007.

The only legal provision which the Deputy Minister quotes is Article 94 of the Somaliland Constitution which deals with the composition of the Council of Ministers and gives no specific power to the Deputy Minister to issue this Decree.

The second part of this note is the formal response by the Board of SHURO-Net.

In an interview broadcast on 3 November 2007, the Minister of Justice has distanced himself from this decision and was quoted as saying that the Ministry's function is to assist and support human rights organisations.

www.somalilandlaw.com

04/11/07

Warqada Wasiiraka iyo Jawaabata SHURO-Net

30 October 2007: Wasiir-ku-xigeenka Caddaaladda, Yuusuf Ciise Ducaale (Tallaabo) ayaa u gudbiyey Taliska Guud ee ciidanka Booliska Somaliland iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha Qaraar:

Ujeedadeedu: Fulin Xilwareejinta Guddoonka Cusub ee Shuronet

Wasaaradda Caddaaladdu:

Markay aragtay : Qodobka 94aad ee Dastuurka Qaranka

Markay aragtay: Natiijada ka soo baxday shirkii aan caadiga ahayn (extra-ordinary meeting) oo ay iskugu yimaaddeen ururrada xubnaha ka ah Dalladda Iskuxidhka Ururrada Waddaniga ee Xuquuqul Adamiga, taas oo nuxurkeenu [nuxurkeedu] ahaa inay doorteen guddi hoggaamineed oo cusub oo kala ah:

1. Cabdillaahi Aadan Cumar (Wayab) Guddoomiye
2. Hoodo Maxamed Xasan Guddoomiyekuxigeen
3. Saleebaan Ismaaciil Bullaale Xoghaye

Markay aragtay: In Dalladda Shuronet oo sife sharci ah uga diiwaangashan Wasaaradda Caddaaladda inay xaq u leeyihiin xubnaheedu (ururradeedu) inay qabsadeen Shir aan caadi ahayn intii badnayd (Majority) sife sharci ahna ay ku doorteen guddoonkoodaas.

Markay tixgelisey Mabaadiida Guud ee Dimuqraadiyadda ee Dastuurka Somaliland ku salaysan yahay oo ah in qofku wax dooran karo, lana dooran karo.

Markay aragtay: Waafaqsanaanta Dastuurka Dalladda Shuronet

Markay tixgelisey: Danta Guud ee Caddaaladda.

Waxay Go'aamisey:-

1. In Taliska Guud ee Ciidanka Boolisku fuliyo go'aanka sida sharciga iyo dimuqraadiyadda ku dhisan uga oo baxay Shirweynaha aan caadiga ahayn ee Shuronet, 24.10.07.
 2. Inay xilwareejin u sameeyaan guddoonka cusub lana sugo hay'adda Ammaankeeda.
-

31/10/07 Jawaabat Guddoomiyaha Dalada Xuquuqal iinsaanka ee Shuro-net Marwo Zamsam Cabdi Aadan iyo todoba Xubnood oo kale oo maanta soo saareen.

Ujeedo: jawaab-celin:

Anaga oo ah dhamaan Guddida hogaaminta ee Ururada xuquuqal iinsaanka ee ku bahoobay Dalada SHURO-NET, anaga oo tix-raacayna warqada amarka ah ee ka soo baxday Wasaaradda Cadaaladda ee tirsigeedu yahay WC/WAG/G/667/07 ujeedadeeduna ahayd fulin xil-wareejin. Hadaba anaga oo ah Ururada xuquuqal iinsaanka JSL,isl a markaana ixtiraamayna una hogaansan shariyada inoo taal waxaanu u aragnay waqadan mid baalmarsan shariyada Ururada ijtimaa ciga ah ee wadanka. Waqadan oo runtii af kala qaad ku noqotay dhamaan Ururada Ijtimaa ciga ah iyo inta danaysa u doodida xuquuqal iinsaanka JSL. Iyada oo ay Wasaaradda Cadaaladdu dhex u tahay dhamaan Ururada u dooda xuquuqal iinsaanka, balse ay waqadani u muuqato mid muu jinaysa in Wasaaraddu baalmartay shariyada u yaal Dalada SHORU-NET, oo ay dhigteen Ururada ku bahoobay.

Sidaa darteed, waxaanu mar labaad xusuusinaynaa Wasaaradda cadaaladda JSL, in shirkaasi ahaa sharii-daro iyo inqilaab, maadaama shirweynihii Dalada ee sharciga ahaa dhacayo 23-ka bisha Dec/07 ee fooda inagu soo haya, haatana ay hawlaheedu bilaabmeen Guddigii qaban-qaabada, shirwaynaha googol-xaadhkisiina socdo. Shirkaas oo cid kasta oo hunguri ka hayo hogaanka Ururka uu xaq u leeyahay in uu isa soo sharxo si dimuquraadi ah.

Ugu dambeyntii waxaanu u soo jeedinaynaa Wasaaradda Cadaaladda JSL, in ay faragalinta ka dayso ururada xuquuqal insaanka, ixtiraantana shariyada Dalada SHURO.

Allaa mahad leh.

Magacyada guddida hogaaminta ee Dalada SHURO-NET;

- 1- Zamzam Abdi Aden , Guddoomiye
- 2- Mahamed Cumar Mahamed. G/xigeen.
- 3- Canab Hasan Mahamed, xunin.
- 4- Aadan Ismail Gedi, xubin
- 5- Mahamed Abdale Elmi xubin
- 6- Fahad Hasan Abdale xubin
- 7- Ahmed Saleebaan Maxamuud xubin
- 8- Rashiid Cabdi Xuseen, xubin